

Hagitaan ku socda qofka laga qaaday saami baadhitaanka fayraska koronaha ee COVID 19

Marka lagaa soo qaado baadhitaanka fayraska koronaha waxaad toos u tagtaa gurigaaga adiga oo xidhan af iyo san dabool xidhan waxaanad gashaa karaantiil aad adigu dajjisatay.

Joog gurigaaga iskana ilaali in aad dadka la kulanto illaa inta aad helayso natiijo negatiif ah iyo inta aay kaa baaba'ayaan calaamadaha xanuunku.

Jawaabta baadhitaanka

- Helitaanka jawaabta baadhitaanku waxaay qaadataa 1-3 maalmood.
- Jawaabta baadhitaanka negatiifka ah waxaa lagugu soo ogaysiinayaa fariin taleefanka ah. Haddii jawaabtu ay negatiif tahay macnaheedu waxaa weeyaan inaanad lahayn cudurka koroonaha. Haddii ay calaamadahaaga xanuunku sii kordhaan, mar labaad tag baadhitaanka.
- Jawaabta baadhitaanka bositiifka ah waxaa lagugu soo ogaysiinayaa mar kasta taleefan ahaan, xataa dhamaadka todobaadka iyo maalmaha feestada ah ee todobaadka dhexdiisa ah. Waxaa laga yaabaa in lagaa soo waco lambar sir ah. Haddii jawaabtu ay bositiif tahay macnaheedu waxaa weeyaan inaad leedahay cudurka koroonaha.
- Natiijada baadhitaanka waxaad ka arki kartaa
 - www.oulunomahoito.fi > Terveyspalvelut > Laboratoriotulokset
natiijadu waxaay halkaas ka muuqataa isla wakhtiga ay u muuqato xarumaha nolol wanaagga
 - www.Omakanta.fi > Terveystiedot > Laboratoriotutkimukset
Natiijadu waxaay muuqanaysaa qiyaastii 3 maalin gudaheed marka aay jawaabtu diyaar noqoto.
 - Waxaan ka xunahay in mas'uulka ilmuhu uunan arki karin natiijada ilmaha 10 sano ka wayn.
- Haddii aad u baahato waxaad waydiin kartaa natiijada baadhitaankaaga ama ta ilmahaaga xarunta nolol wanaagga ee aad la macaamiisho qaybtooda Omahoito ama adeegga chat-ka ah ama lambarka laga qabsado ballamaha.

Ku laabashada xanaano-maalmeedka, iskoolka ama shaqada

- Qofka wayn iyo ilmaha da'da iskoollayda ah iyo qofka dhallinyarada ah waa in uu sugaa inta uu ka helayo natiijada negatiifka ah inta aanu ku laabanin iskoolka ama shaqda. Fayrasyada oo dhan waa lakala qaadaa, waa muhiim in qofku uu guriga joogo inta aay calaamadaha xanuunku ka yaraayanayaan.
- Ilmaha da'da iskoollayda ka yar wuxuu ku laaban karaa xanaano-maalmeedka marka jawaabta baadhitaanka oo negatiif ah la helo oo ay calaamadaha xanuunku si muuqata uga yaraadeen. Haddii helitaanka jawaabtu ay dheeraato ilmuhu wuxuu xanaano-maalmeedka ku laaban karaa marka uu hal maalin bilaa astaamaha xanuunka ahaado, haddii qof qoyska ka mid ah fayraska koronaha aanan lagu caddaynin ama uunan si kale halis ugu galin in uu qaado ama qof qoyska ka tirsan uunan 10 maalin ee u dambeeyay uunan dibadda u safrin.
- Haddii sarkaaladda dowladdu ay kugu amreen in aad gasho karaantiil, natiijada negatiifka ah ma soo gaabinayso karaantiilkaaga.
- Haddii aad natiijo boositiif ah hesho waa in aad dadka kale iska soocdaa illaa inta aad 2 maalmood bilaa calaamado xanuun tahay, laakiin mar kasta waxaad ku khasbantahay in aad dadka iska soocdo ugu yaraan 10 maalmood.

Latalinta luqadaha badan waxaad caawimaad uga heli kartaa marka aad danahaaga qabsanayso

[La talinta luqadaha badan](#) ee Villa Victor waxaad caawimaad ka helaysaa haddii aad tusaale ahaan rabto in aad la xidhiidho la talinta koronaha, laakiin aanad ku hadlin finish kugu filan ama ingiriis. Waxa kale oo aad heli kartaa macluumaad ku saabsan koronaha. Koronaha dartii a talinta luqadaha badan waxaa lagaaga adeegayaa ugu horrayn iyada oo taleefan ah iyo iyada oo WhatsApp ah isniin-khamiis saacadda 9-16 iyo jimcaha 9-16. Goobta la talinta waxaa laga heli karaa qaybta dariiqqa ku taalla ee Oulu10

af carabi/af berbari/af faransiis tel. 040 651 5687

Goobta la talinta waxaa laga heli karaa qaybta dariiqqa ku taalla ee Oulu10

isniintii saacadda 9-16.30

salaasadii saacadda 9-16.30

arbacadii saacadda 9-16.30

khamiistii saacadda 9-16.30

jimcihii saacadda 9-16

af dari/af farsi tel. 040 484 2993 Latalin fog oo kaliya

arbacadii saacadda 9-11.

isniintii saacadda 9-12

af shiine/af jabaniis tel. 040 617 4470 Latalin fog oo kaliya!

salaasadii saacadda 13-15

af soomaali tel. 040 589 3052 Latalin fog oo kaliya

isniintii saacadda 12-14

salaasadii saacadda 10-12

arbacadii saacadda 12-15

khamiistii saacadda 9-12

isniintii saacadda 10-11

af thai tel. 040 480 6295 Latalin fog oo kaliya!

jimcihii saacadda 14-16

af tigrinja tel. 040 586 1724 Latalin fog oo kaliya!

isniintii saacadda 16-20

salaasadii saacadda 16-20

arbacadii saacadda 16-20

khamiistii saacadda 16-20

jimcihii saacadda 16-20

af fietnamiis tel. 040 182 6198 Latalin fog oo kaliya!

jimcihii saacadda 12-14

af turki/af kurdish tel. 040 482 9260 Latalin fog oo kaliya

salaasadii saacadda 15.30-17.30

khamiistii saacadda 15.30-17.30

af ruush/af hollandiis tel. 040 621 1714 Latalin fog oo kaliya

isniintii saacadda 12-14

salaasadii saacadda 9-12

arbacadii saacadda 12-14

khamiistii saacadda 12-15

jimcihii saacadda 12-14